



## Annaga muhiim ayaad adigu noo tahay

Annaga haddaanu nahay SISAB (Hantida dugsiga ee ma guurtada ah ee Stockholm AB) waxaanu u baahannahay in badan oo adiga oo kale ah oo arkaya, maqlayana waxa ka dhacaya dugsiyadeenna iyo dugsiyada xannaanada iyo barbaarinta carruurta. Si wadajir ah waxaannu u joogin karnaa waxyeelleynta iyo dab qabadsiinta. Dab waxaa uu sida ay tahay u baabi'in karyaa waxqabad nololeedka carruurta, ardayda iyo macallimiinta oo dhan. Tusaale ahaan sawir gacmeedyada, waxyaabaha la isku rarakibay iyo waxyaabaha shakhsii ahaaneed. Dugsi xannaano iyo barbaarin carruureed iyo dugsi waa in ay ahaadaan goob ammaan ah halkaasoo adiga, saaxiibadaa iyo walaalahaa ay ka urursadaan xasuus, aqoon loo aayo iyo dhammaan laga billaabo saaxibbo iyo jeceylki ugu horreeyay ilaa iyo sida la rejeynayo rabitaan waxbarasho.

Waa muhiim sidoo kale in la xasuusto in qofka qaadaya dhagax ee jebinaya daaqad ama deb ku shidaya dambiil qashin in yahay qof malaha ay ka maqantahay si kale oo uu u dhaho “i arka/i caawiya!”

### Maxaad sameyn kartaa?

Uga hadal taas! Guriga, dugsiga iyo midba midka kale.

- Waa maxaay sababta ay koox yari uga ciyaareyso nolosha dad aad u fara badan?
- Maxaa u sabab ah?
- Maxaa ay noqoneysaa natijjadu?

Waxyeelleyntu waxaa ay qiime ahaan ku kaceysaa dhawr milyan oo koron sannad walba. Laakiin wax walba waxaa ugu xun haddii ay cid bani'aadanihi ku dhaawacanto.

Annaga haddaanu naa SISAB taageero ayaanu fadlan bixineynaa, la hadal waardiyyaha si aad u heshid nambarka taleefanka milkiilaha guriga ama maamulaha SISAB. Waa annaga cidda leh oo gacanta ku haysa dhismooyinka dugsiyada iyo dugsiyada xannaanada iyo barbaarinta carruurta ee magaalada.

### Is gacan qabta midba midka kale!

Bogaadin naga timid annagoo ah SISAB  
Juun 2016

